Seattle Parks & Recreation

healthy people healthy environment strong communities

# FULINTA QORSHAHA Istraatijiyadeed ee 2021

*Dib ayaan ula xiriirenaa bulshadeena si aan diirada u saarno ahmiyadeena.*

Bilowgii 2020, Markii lagu soo aruuriyay dadweynaha ra'yi fara badan kabacdii, Waaxda Jardiinooyinka iyo Madadaalada Seattle (SPR) waxay soo bandhigeen Qorshe Istiraatiiji ah oo hagaya barnaamijyada, adeegyada, iyo maalgashiga laga bilaabo 2020 illaa 2032. Hirgelinta qorshahan ayaa dib loo dhigay markii SPR ay u wareegtay hawlgallo degdeg ah ee ku saabsanaa masiibada COVID-19. Maadaama aan hada tixgelinayno sida loo hirgelinlahaa hadafkaan, waxaan donenaa inaan **dib ula xiriirno bulshadeena** si aan u hubinno in qorshaynteenu loo ogaado hadii ay is badeleen baahiyaha iyo hadafyada kale.

*Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee 2020-2032 ee SPR wuxuu qeexayaa balanqaadyadeena si*

## CAAFIMAAD

*In la biixiyo barnaamijyo umada u siman ▪ In lagu dadaalo inay da 'kasta iyo karti kasta ay ka fa'iidaysan karaan ▪ In la ilaaliyo meelaha tayada sare leh ▪ In aan wadaagno macluumaadka ku saabsan adeegyadayada ▪ Inaan hubino in la heli karo goobaha dadweynaha ▪ isku xirka meelaha dhibiciga ah ▪ In dib loo qorshayo xarumaha bulshada ▪ dhisida xarumaha adeegyada badan leh ▪ hagaajinta qaabka cuntada loo helo*

## DEEGAANKA CAAFIMAADKA

*Maaraynta biyaha si joogto ah ▪ yaraynta qashinka ▪ yaraynta qiiqa kaarboonka ▪ soo celinta kaymaha magaalooyinka ▪ ilaalinta dhulka seeraha ▪ In la dhiso xaruumo u adkaysan kara cimilada ▪ hagaajinta isku xirnaanta ▪ maalgelinta tamaraha kale sida korantada ▪ in la wanaajiyo meelaha dhibiiciga ah ▪ In la kordhiyo oo la simo qabka ay dadka ku helaan jardiinooyinka*

## BEESHA XOOGAN

*In la bixiyo fursadaha kobcinta ▪ bixinta daryeelka carruurta ▪ yaraynta adeegyada caqabadaha leh ▪ maalgalinta barnaamijyada ay bulshadu wadato ▪ wanaajinta amniga jirdooyinka ▪ Inaan ka jawaabno hoy la aanta ▪ Inaan tageerno dhacdooyinka bulshada ▪ Warka iyo hadalada la cadeeyo ▪ In la raadiyo fursado dhaqaale ▪ In dadka nala shaqeeyo aan si fiican u wado xiirno ▪ In la dhiso musqulo dadweyne oo nadiif iyo amaan ah*

## IN MEEL HEER SARE AH LA GAARO

*In la baaro xaalda sinnaanta ee dadka ku jiraan ▪ In la helo aqoonsiyo wadanka ka jiro ▪ dhisida shaqaale xoog leh ▪ maalgelinta shaqaalaha ▪ cusbooneysiinta nidaamyada ▪ qorsheyn joogto ah ▪ Inaan ka hortagno xaaldaha manta jiro ee caqabadaha badan ▪ magaalada oo dhan in lagu xirgeliyo ▪ dayactirka nolosha bin aadanka ▪ hagaajinta kormeerka bulshada*

*Iyada oo ay ka go'an tahay in:*

**JIDKA SINAAN LAGU GAARIYO:** *Qorshooyinka SPR waxay qayb ka yeelan doontaa in la soo afjaro dhamaan cunsuriyadaha kala duwan iyo dhaqan sarraynta cadaanka.*

# ISBEDEIKA MACNAHA

18kii bilood ee la soo dhaafay, Seattle waxay la kulantay khalkhal iyo isbeddel aad u weyn. Markaan dib u qiimayno ficilladaheena mudada-gaaban iyo maalgelinta aan samaynay, waxaan **raadinaynaa jawaab-celin** ku saabsan sida jardiinooyinkeena iyo adeegyada madadaaladu ay door ugu yeelan karaan ka-jawaabida afar mashaakil oo is-barbar socda oo aan la kulanay:

**CAAFIMAADKA DADWEYNAHA IYO WANAAGGA**

**IN JINSIYADA DIB LOO QIIMEYO**

**DHAQAALAHA HOOS U DHACDAY**

**SAAMAYNTA ISBEDELKA CIMI-LADA**

**Bisha Agoosto iyo Sebtember 2021,** waxaan qorsheyneynaa inaan wada xiriirno bulshooyinka aan u adeegno, dhowr hawlood anako adeegsanayno ayaan u wada xiriiri doonaa:

- SPR iyadoo hagaanka wado baan xirgelinaynaa **fadhiyada is -weydaarsiga** ee ururada bulshada
- Waxaan wadnaa wacyi-gelin la is arkiyo iyo sheekooyin, kuwaas oo ka socdo **jardiinooyinka** iyo **dhacdooyinka bulshada, oo** ay ku jiraan adeegyada tarjumaada
- Kulan **furan oo onlayn ah** ayaa lagu kala ogaaniyaa baahiyaha hadda jira
- Wadahadalo lala yeesho **shaqaalaha SPR** ee ka kooban qeybo kala duwan si ay wax uga bartaan khibradahooda xirfadeed iyo nololeed
- Waxaan la xiriireenaa ka -qaybgalayaasha **barnaamijyadeena,** booqdayaasha **xarumaheena, jardi-inooyinkeena, iyo meelaha banaan,** ee lagu qabto dhacdooyinka wacyigelinta ee jira **oo mashaariicda raasumaalka ah** , iyo in ka badan!

# MAXAA KU XIGA




# KU XIDHNOW OO WAX BADAN BARO

Akhri Qorshaha Istiraatiijiyadeed oo la soco wixii cusub iyo fursadaha kale ee hawlgelinta ku saabsan:
http://www.seattle.gov/parks/strategicplan

Nala soo xiriir! Nala wadaag fikradaada iyo waxii kale aad haysid.
PKS_SPRStrategicPlan@seattle.gov